


MAXAYNU UGU BAAHANAHAY!

1. Somaliland waxay ka mid tahay 13 dal ee Afrika ku yaal ee halista ugu jira inay waajahaan biyo la'aan baahsan marka la gaadho sannadka 2025
2. 30% dadkeenu ma haystaan biyo nadiif ah, taas oo ay halis ugu jiraan inay asiibaan xanuun no naftooda khatar galin kara
3. Biyaha nadiifta ahi waa qaali, foostadda (200 liter) waxay la siiyaa 12,000/= SLSH
4. Biyaha roobku waa waa khayraad dabiiciya oo marka la qabto kharash badan u baahnayn, nadiif ah, oo cid kastaa awoodi karto
5. Habka qabashadda biyaha-roobku waxay ka hortagtaa biyo la'aanta iyo daadadka.

**Ma Og Tahay Inaad Gurigaaga 100 M2
Aad Ka Heli Karto Wax Ka Badan 200
Foosto Sannadkii.**



UJEEDOYINKA MASHRUUCA QABASHADDA BIYAHA ROOBKA

- In Ardayda dugsiyadu inay helaan biyo nadiifa oo caafimaadkooda kor u qaada.
- In Dugsiyaddu yeeshaan biyo-roob-qabatin dhamaystiran (Complete rainwater harvesting system)
- In Bulshada tooloyinka dugsiyada ku xeeran ay ka faa'iidaystaan biyaha dugsiyada loo qabanayo In la helo biyo nadiif ah oo la awoodi karo iyadoo la adeegsanayo majarooradda
- In ilaalinta deegaan kaqayb ka ahaato qabashada biyaha roobka



GET IN TOUCH

Opposite to Hargeisa Cultural Centre,
Sha'ab Area, Hargeisa

Phone | 252-2-528629
Fax | 252-63-4054943

www.iprt.info

MASHRUUCA QABASHADDA BIYAHA ROOBKA EE DUGSIYADDA



Mashruucan waxa fulinaysa
haayadda IPRT, waxaana
maalgalisay Haayadda GIZ



IPRT
Institute for Practical
Research and Training

giz
Deutsche Gesellschaft
für Internationale
Zusammenarbeit (GIZ) GmbH

BIYAHU WAA NOLOSHA NOLOSHU WAA BIYAHA



WAXTARKA BIYAHA QABASHADA ROOBKA

1. Biyaha sida fiican loo qabtay ee roobku waxay ku haboon yihiin cabitaanka, cunta-karinta, dhar-dh aqista, nadaafadda guryaha iwm
2. Waxa loo adeegsadaa wax-soo-saarka dalagga beeraha
3. Wuxuu ilaaliyaa deegaanka, gaar ahaan ka hortago jeexjeexyadda
4. Waxay kor u qaadaan heerka xadiga biyaha dhulka hoostiisa ku jira abaaraha iyo fatahaadaha.

TAARIKHDA QABASHADDA BIYAHA ROOBKA


Dadka Somaliland waxa lagu tilmaamaa in 70% inay ahaayeen xoolo-dhaqato, kuwaas oo xoolahooda u raadiya hadba halkii baad iyo biyo leh. Biyahaas oo qabtaan qooqaamaha, dooxooyinka, balayadda iwm.

Habka qabashadda biyaha roobka waxa uu bilaabmay tan iyo intii ay bilaabmeen deegaamadda magaalooyinka iyo tuulooyinku. Waxaanay dadku barteen inay biyaha qabsadaan iyagoo adeegsanaya majarooradda. Waxa sidoo kale markii ugu horraaysay bilaabmay baraagaha.

Laakiin habkaasi wuu yaraaday markii biya-galinta ay magaalooyinka waaweyn ka bilaabmatay.

Waxaanay dadku u guureen inay qasabaddaha iyo booyadaha baahiyahooda biyood ku tiirsanaadaan.

Habkan biyo-qabashadda roobka iyadoo la adeegsanayo majarooraddu waa hab inta badan adduunyaddu haatan u soo laabanayso lana ogaaday faa'iidooyinka deegaan ee uu leeyahay iyo waliba isagoo kharashka biyaha ku baxayay ee badnaa aad u yareeyay.



HABKA BIYAHA LOO QABTO MAJAROORADDA

Habka qabashadda biyaha-roobka iyadoo la adeegsanayo majarooraddu, waa hab fudud oo dhaqaale badan u baahnayn, xaafad kastaana samaysan karto. Reer kastaa wuxuu samayn karaa marjaroor oo biyaha ka dhacaya saqafka gurigiisa oo ku samaysan jingadda ama sabadda oo ku shubo taangi ama barkad yar.

BIYAHA ROOBKU MA NADIIFBAA!

Biyaha roobku waa biyaha ugu nadiifsan ee qofku heli karo. Qaabka ugu hawsha yar ee aad uu heli kartaana waa adiga oo saqafka gurigaaga ku xidha majaroor kaas oo ku talaalan taangi ama barkad yar.

Roobka ugu horreeya waxa loo adeegsadaa inuu biyaha saqafka nadiifiyo adigoo taangiga biyaha ka duwaya. Marka uu saqafku maydhmo ee ee nadiif noqdo waxa aad si toos ah ugu duwi kartaa biyaha majaroor ka taangiga ama weelka kale ee aad biyaha ku ururinayso. Majaroor ka afkiisa ku ridaya taangiga waa inuu lahaadaa qayb sida shaandhadda oo kale ah oo caleemaha iyo waxyaalaha kale ee xashiishka ah ka reeba inta aanay gaadhin taangi-ga.

Sidoo kale, taangiga ama barkadda yari waa inay lahaataa dabool si aanay kanecadda iyo cayayaanka kale aanay u galin.